

Waa maxay er Smittestopp?

Smittestopp waa barmaamij (app) ay sameeyeen Machadka Caafimaadka Dadweynaha (FHI). Waxa uu ka qaybqaadan doonaa joojinta in fayrusta koroonadu ku dhex faafto bulshada. Isticmaalka barmaamijku waa ikhtiyaar.

Haddii aad iska qaado tijaabo/baaritaan oo lagaa helo fayrusta koroonada, dadka ayaad ka ogeysiin kartaa barmaamijka dhexdiisa. Markaa waxay ogaan doonaan in ay suurtagal tahay in ay qaadeen fayrusta, waxaana la siinayaa talooyin ku saabsan waxa ay samayn doonaan. Sidaas ayuu barmaamijku uga hortagi karaa in dad kale xanuunsadaan. Barmaamijku ma sheegi doono in adigu aad tahay qofka laga helay fayrusta.

Sidee barmaamijka Smittestopp loo geliyaa telefoonka?

- Barmaamijka ka soo deji App Store ama Google Play.
- Gudaha barmaamijka waxaad raacdaa tilmaamaha ka muuqan doona shaashadda.
- Haddii aad fahmi weydo luuqadda, qof weydiiso inuu kaa caawimo fahamka qoraalka.

Sidee u shaqeeyaa barmaamijka Smittestopp?

Marka aad u dhawaato qof barmaamijku ugu jiro telefoonka, ayaa telefoonadu isu dirayaan seenyaalo (signalo).

Haddii qof kale iska qaado tijaabo oo laga helo fayrusta koroonada, waxa barmaamijkan ku jira telefoonkaagu xasuusan doonaa in telefoonkaagu u dhawaaday telefoonka qofka laga helay fayrusta. Markaa barmaamijka ayaa kuu sheegaya waxa wacan inaad samayso. Waxa kale oo aad dooran kartaa inaad dad kale ogeysiiso haddii lagaa helo fayrusta.

Haddii aad farriin ka heshid barmaamijka waxa keliya oo lagu sheegayaa in ay dhici karto in lagu qaadsiiyey fayrusta, oo ma lagu sheegayo qofka qabay fayrusta ama meesha lagugu qaadsiiyey. Dawladda ama shakhsiyaad midkoodna ma ogaan doono dadka aad tihiin ama meesha aad joogteen.

Ilaalinta macluumaadka qofka

- Waa inaad ka weyntahay 16 sanno jir si aad u isticmaalli kartid Smittestopp.
- Macluumaadka kugu saabsan waxa la tirtirayaa 14 maalmood kadib adoo u baahnayn inaad wax samayso.
- Marka aad doontid ayaad macluumaadka kugu saabsan ka dhex tirtiri kartaa gudaha barmaamijka.
- Barmaamijka waxaad tirtiri kartaa marka aad rabto.

Ka qaybqaado soo celinta noloshii caadiga ahayd